**FAAFINTA** **RASMIGA**

الجريدة الرسمية

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية ارض بونت الصومال

**Sanadka 8-aad. Garowe 25. January. 2007** **Lam. 1**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدةالشهرية

***Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

---

# TUSMADA

## Qeybta Koowaad

## Sharci

## Qeybta labaad

## Xeer

## Qeybta Saddexaad

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

***Sharci Lr. 5. ee 15/01/2007, kuna saabsan Heshiiska badda iyo ilaalinta xeebaha Puntland ee Shirkada AL-xabaabi.***

bogaga 56-104 69-104

DAWLAD GOBOLEEDKA
PUNTLAND EE SOMALIYA

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

Xafiiska Madaxweyne ku xigeenka
Ahna sii hayaha xilka Madaxweynaha

Office of the Vice-president
being an acting president

**Sharci Lr.5 ee 15/01/2007, kuna saabsan Heshiis Badda iyo Ilaalinta Xeebaha Puntland ee Shirkada AL-xabaabi.**

**Madaxweynuhu**

| | | |
|---|---|---|
| **Markuu arkay** | **:** | **Dastuurka DGPl qodobkiisa 55-aad faqradiisa 1-aad.** |
| **Markuu arkay** | **:** | **Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/188/2006 ee 16/12/2006.** |
| **Markuu Arkay** | **:** | **Vitowgii Madaxweynaha ee Heshiiska Badda iyo ilaalinta Xeebaha Puntland.** |
| **Asagoo Garowsday** | **:** | **Ansixinta Sharcigan Badda iyo Ilaalinta Xeebaha.** |
| **Tixgaliyeyna** | **:** | **Muhimada iyo Qiimaha weyn ee Mashruuca dalka iyo dadkaba ugu fadhiyo Heshiiskani** |

**Wuxuu soo saaray**

**Sharcigan soo socda:-**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sida kor ku cad sharciga Heshiiska Badda iyo ilaalinta Xeebaha.

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan garyaqaanka guud iyo kan xog-hayaha Golaha Wakiilada.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa Waqtiga uu faafinta Rasmiga ah ee Dawlada ku soo baxo, baahi loo qabo darteed. Wuxuuna kamid noqonayaa sharuucda Puntland, iyadoo cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

**Wabilaahi Towfiiq**

**Mud. Xasan Daahir Maxamuud**
**Madaxweyne ku xigeenka**
**ahna Sii haya Xilka Madaxwenaha**

Puntland State of Somalia
Office of the Vice President
Garoowe

## Soo Bandhigid Kooban ee Mashruuca Ilaalinta Xeebaha DGP oo ah 1300 km

### Ujeedooyinka Mashruuca

1. In la sugo ujeedooyinka istaraatijada ah ee DGP ay leedahay xeebaha Sharciga, taas oo ah in dhammaan si buuxda loo ilaaliyo Biyaha baddaha ee DGP,iyadoo loo dhammaystirayo wixii qalabayn ah iyo wixii xag maamulba iyadoo ah sida soo socta:

2. In la keeno qalabka ilaalinta Electaronic-ga, Radarka iyo Dooribeenka badda si loo ilaaliyo Biyaha Badda ee DGP.

3. Ilaalinta Dhaqdhaqaaqa Maraakiibta ee Biyaha Badda ee DGP,Kuwa Ganacsiga iyo Kuwa Kalluumaysiga,Dhammaan kuwa ajnebiga ah iyo kuwa Wadaniyiinta ahba,oo Loo ogolaado Ruqsadaha Kalluumaysiga in ay ka kalluummaystaan Biyaha Badda ee DGP,kana shaqaystaan,si waafaqsan Shuruucda Kalluumaysiga iyo in la soo saaaro Ruqsad, lana dabogalo ruqsadaas.

4. Ka hortaga iyo ka ilaalinta Maraakiibta iyo Doonyaha aan wax fasax ama ruqsad u haysan soo gelidda, ka kalluumaysiga ama ka shaqaysiga Biyaha Badda ee DGP taas oo loo samaynayo (8) Barood,oo mid ka mid ahi ay tahay Barta Hogaaminta ee Dekedda Bosaaso.taas oo lagu qalabaynayo Qalabka Radaar,Dooribeenno iyo Qalab Isgaarsiineed oo Electronic ah. Taas oo lagu fidinaayo dhammaan goobaha Kalluumaysiga ee muhiimka ah sida ku cad Shaxda hoos ku qoran ee dhererka Xeebta DGP iyo baaxad dhan 96 Mayl Baddeed oo biyaha badda sii gashan ku sii fog gudaha Badda.

5. In kor loo qaado heerka aqoonta xubnaha soomaalida ah ee ka shaqayn doona Ilaalinta Xeebaha, Iyadoo la kaashanayo aqoonyahanno iyo Khubaro aqoon u leh.lana siinayo Tababarro la xiriira Ilaalinta Xeebaha iyo Adeegsig

Ministry of Fisheries, Ports, Marine Transport & Marine Resources of Puntland

**Qorshayaasha Waaweyn Ee Mashruuca**

**Aragtida Mashruuca waa sidaan soo socda:**

Hawlaha Ilaalinta Mashruucu waxay ku xirantahay Fulinta waxyaabaha soo socda:

1. Hirgelinta habka isgaarsiineed oo wada shaqeeya
2. Qorshe ilaalineed oo loo adeegsanayo qalabka Elecronica iyo kan Dooribeenka iyo Hawl-gelinta Maraakiibta iyo Unugyada saaran iyadoo la dhaqaajinayo waqtiga munaasibka ah loo baahan yahay.

## Si Taas loo Gaaro waxaa waajib ah

**Marka hore**

1. Waxaa lagama maarmaaan ah in Barta Hogaaminta haysato xogta dhammaan Maraakiibta Kalluumaysiga kuwa Ganacsiga oo ku jira Biyaha Badda DGP ama ku soo socda biyaha Badda DGP iyo dabagalka hubinta maraakiibta kalluumaysiga oo haysta fasaxa kalluumaysiga.
2. Dhammaan maraakiibta kalluumaysiga waa in ay soo gudbiyaa Macluumaadka Markab ama gaadiid kasta

- Magaca Markabka
- Calanka Markabka Saaran
- Lambarka Diiwaangelinta Markabka
- Nooca Markabka ama Doonta
- Lambarka shatiga fasaxa ee uu haysto.

***Marka uu soo gaaro 50mayl baddeed meel u jirta Xeebta DGP***

3. Wuxuu ku celcelinayaa in uu soo gudbiyo Macluumaadkaas markuu soo gaaro 35mayl baddeed.
4. Doonyaha Kalluumaysiga ee Wadaniga ah waa in ay qaataan fasax,ka hor inta ayan ka ambabixin marsooyinka kalluumaysiga iyo meelaha mashruuca ilaalintu ka shaqaynayo, si ay ula socdaan baraha ilaalinta dhaqdhaqaaqooda looguna gudbiyomacluumaadkooda ee Barta Hogaaminta Dekedda Bosaaso.

5. Dhamaan maraakiibta Kalluumaysiga marka ay qaataan ruqsada fasaxa kalluumaysiga waxay la socodsiinayaan dhammaan baraha kale ee ilaalinta.

6. Waxaa bar kasta si deg deg ah u soo gudbinaysaa markay aragto wax markab ama doon ah amaba dhaqdhaqaaq gaadiid baddeed oo ayan ka haysan wax la xiriira macluumaadkiisa ah ama haybta uu leeyahay barta Hogaaminta ee Bosaaso.

7. Haddii ay dhacdo xaga isgaarsiinta in ay la xiriiri waydo Barta Hogaaminta ee Dekedda Bosaaso waxay barta aragta markab ama dooni qaadanaysa waajib ah in ay ka hortagto si deg deg ah.

8. Waxaa lagu muujinayaa tabeelayaasha la dhigaayo barta hogaaminta iyo baraha ilaalinta dhammaan maraakiibta ku jirta biyaha badda DGPl.

## Marka 2aad

1. Waxaa la dejinayaa qorshaha dhaq dhaqaaqa Laanjiyada ilaalinta oo maalinle ah,waqtiyo kala duwan iyo iyada oo la adeegsanayo sida maraakiibta kalluumaysiga ugu kala badanyihiin aagaga biyaha badda ee DGPL.

2. Waxaa la adeegsanayaa laanjiyaasha iyadoo lagu salaynayo xaaladda badda iyo baahida taagan ama soo baxda,mar walbana waxaa awaamiirta laga qaadanayaa xarunta Barta Hogaaminta ee Dekedda Bosaaso.

3. Dhammaan dhaq dhaqaaqyada iyo hawlaha ilaalinta waxaa laga amrayaa barta hogaaminta ee Dekedda Bosaaso.

## Qalabka loo Baahanyahay

### *Qalabaynta Barta hogaaminta dhexe ee Dekedda*

1. Raadaarka badda oo gaara wax kara 96 mayl oo badda ah
2. Tabeelaha muujinaya diiwaan gelinta maraakiibta wuxuu oo laanayaa Rugta Dhexe
3. Doorabiinka habeenkii wax lagu arko(2).
4. Qalabka Isgaarsiinta oo xaruntiisu ahaanayso Rugta dhexe.
5. 4 doonyaha dheereeya oo qoryuhu ku rakiban yihiin dherekooduna yahay meter.xawaarahooduna yahay 30 -35 NM/hr,oo ah laba matooraley (1200 HP).
6. Matoorada Dabka Dhaliya (2 xabbo).

## Qalabaynta Baraha Ilaalinta ee Raadaaradda

### *Raas Casayr, Raas Xaafuun, Raas Macbar , Eyl iyo Garacad*

1. 5 Radaar oo gaara ama wax ka qabta 96 mayl.
2. 10 Doorabiinka habeenkii wax lagu arko.
3. 10 Tabeelaha diiwaan gelinta ah.
4. 5 Saldhig Isgaarsiineed iyo hal Saldhig oo Kayd ah oo markii loo baahdo la isticmaali karo.
5. 6 Matooradda dabka dhaliya oo mid ka mid ahi kayd yahay.

### Qalabaynta Baraha Ilaalinta.

### Qandalla & Binna

1. 4 doorabeen habeenkii wax lagu arko ah.
2. 2 tabeele oo diiwaan gelin ah
3. 2 Saldhig Isgaarsiineed
4. 3 laanji oo dheereeya noocooduna yahay GRP oo laba matoorle (400 – 600 HP).
5. 2 matoorada dabka dhaliya ah.
6. 2 Soolar ah.

## Qalabaynta Doonyaha Qoryuhu saaran yihiin

1. 4 dooribeenka Ilaalada aaga
2. 4 Jiheeye wareega ah
3. Suumanka Badbaadada
4. Madfaca iyo Zuu 23
5. Hubka Fudud (small arms)
6. Raadaarka Badda
7. Hal raadiye Isgaarsiineed

## Qalabaynta Laanjiyayaasha

1. Raadaarka Badda
2. Jiheeye Badeed
3. Saacadda Socdaalka ee Badda
4. Hal raadiye Isgaarsiineed
5. Suumanaka Badbaadada
6. Hub dhexe oo ku haboon /Munaasib ku ah.

## Dhismayaasha Saldhigyadda

1. Diyaarinta Taawarka Bosaaso oo lagu rakibi karo Qalabka Soo socda :

    1. Raadaar,Dooribeen habeen, Tabeelaha Diiaangelinta iyo qalabka Isgaarsiinta.
    2. Dhismaha Guriga Maamulka
    3. Dhismaha Bakhaarka Kaydka
    4. Dhismaha Matoorka dabka dhaliya.

## Barta Ilaalinta

Barta Ilaalinta waxay yeelanaysa:

1. Hal dhisme.
2. Hal taawar oo ilaalineed oo qaadi kara qalabka soo socda.

i. 6taawar oo la saarayo qalabka araga raadaarka.
ii. 18doorabiinka habeenkii.
iii. 9tabeele diiwaan gelineed.
iv. 9dhisme oo ay dhismihiiba ku noolaan karaan 30qof.
v. Dhisme bakhaarka qalabka oo ay ku jirto qalabka matooradda iyo qalabka dayactirka.

# Lifaaqa2aad.

**Tirada shaqaalaha iyo hawlwadeenada laga rabo dhanka somalida oo Somali ah.**

**1)Barta hoggaaminta ee dekeda boosaaso.**

- Hoggaamiyaha barta xarunta mashruuca
- Hoggaamiye ku xigeenka barta xarunta mashruuca
- 3Madax kooxood ee barta xarunta
- 3Raadaar operators(radar operators)
- 3Shaqaale oo tabeelaha qora
- 3Shaqaale qalab isgaarsiineed

intaasi waxaa dheer,dadkii bedeli lahaa xiliyada fasaxyada,wixii aan ahayn hoggaamiyaha iyo ku xigeenka hoggaaminta.

**Dadka ka shaqaynaya baraha,bar kasta wax yeelanaysaa dadka soo socda.**

1. 4Hoggaamiyeb bareed
2. 4Hoggaamiye ku xigeen bareed
3. 4Madax kooxood
4. 12Shaqaale raadaar(radar operators)
5. 12Shaqaale dooribaan operators
6. 12Tabeele qore
7. 12Shaqaale isgaarsiineed
8. 8Makaanik
9. 8Koronto yaqaan.

Waxaa intaa dheer wixii bedeli lahaa fasaxyada iyo nasashooyinka oo aan ahayn hoggaamiyayaasha iyo ku xigeenadooda.

**Shaqaalaha doonyaha saaran**

1. 3captains(kabtaano)
2. 6kormeer(boarding on ships to inspect)
3. 3madaafiic ride(gunners)
4. 3badmaax(baxri)

waxay shaqaalahaasu nasanayaa bishiiba 6maalmood,waxaana loo baahan yahay shaqaale bedeli kara.

**Shaqaalaha laanjayaasha mid kasta waxaa laga rabaa.**

1. 4 Captains.
2. 4 Sarkaal kowaad
3. 4 Madax kooxeed
4. 4 Shaqaale raadaae

5. 4 Shaqaale isgaarsiineed
6 .4 Madaafiic ride
7. 8 Baxri
8. 4 Makaanik
9. 4 Koronto yaqaan
10. 8 Kormeere.

## Lifaaqa'3aad.

1.caddaynta xeerarka u gaarka ah kalluumaysiga ee DGPL.
2.Soo saarida fasax kalluumaysiga iyo suuq geynta khayraadka badda DGPL oo caalami ah iyo dhinacyada Maaliyadda & lacagta.

## Marka hore:

**Xeerarka kalluumaysiga iyo fiiga laga qaadayo:**

Maamulka DGPL iyo shirkadu waxay wada diyaarinayaan qawaaniinta kalluumaysiga ee aagga oo ka aan ka horimaanayn qawaaniinta caalamiga ah iyadoo lagu dabaqayo qaabka ama habka (EEZ)iyo qannuunka nabadgelyada maraakiibta kalluumaysiga.

## Marka labaad:

### Habka soo saarida ruqsada kalluumaysiga,

Dhamaan ruqsadaha kalluumaysiga waxaa iska leh.

1.wasaaradda dekedaha iyo kalluumaysiga ee DGPL,

2.Shirkada AL-XABAAB marine services waxay ku leedahay in ay la socoto mar kasta oo Laysan ay bixinayso Wasaaraddu.

**Suuq geynta hawlaha kalluumaysiga ee DGPL.**

Shirkada iyo maamulka DGPL waxay ka furanayaan xafiis u qaabilsan hawlaha suuqgeynta iyo macluumaadka,dalka U.A.E.Dubai.waxayna samaynaysaa WEBSITE dawli ah oo lagu baahinayo macluumaadka iyo wararka hawlaha kalluumaysiga ee DGPL iyadoo lala xiriirinayo shriikadaha ku hawlan kalluumaysiga.
Shatiyada ogolaanshaha hawlaha kalluumaysiga waxaa laga soo saarayaa xarunta wasaaradda dekedaha iyo kalluumaysiga ee boosaaso.

## Ilaalinta Noolaha badda ku nool iyo bay'aydda.

Maamulka DGPL iyo shirkadu waxay qawaaniinta u dejinaysaa ilaalinta noolaha badda iyo bay'adda.iyadoo la samaynaayo daraasad ku saabsan noocyada iyo tirade noolaha Badeena ku jira.si loo ilaaliyo loogana hor tago dabar goynta ku yimaada qayb ka mid ah kalluumada isla markaana la ogaado aggaaga ay ku nool yihiin.

## Lifaaqa 4aad.

**Tababarada la siinaayo shaqaalaha.**

1. tababar lagu baranayo qalabka isgaarsiinta iyo adeegsigooda
2. .tababar lagu baranayo raadaarada
3. tababar lagu baranayo nabad galinta la xiriirta hawlaha kalluumaysiga
4. tababar lagu baranayo adeegsiga ku shaqaynta doonyaha iyo laashashka.
5. tababar lagu baranayo sida loo baro ama looga hor tago doomaha kalluumaysiga oo kala duwan.

**Qaabka loo fulinayo mashruuca:**

**1.Wajiga kowaad**

Wuxuu bilaanmayaa 60maalmood ka dib marka ay saxiixaan ama ansixiyaan.

- Madaxweynaha DGPL.
- Golaha wasiiradda DGPL.
- Golaha Wakiiladda DGPL.

Ministry of Fisheries, Ports, Marine Transport & Marine Resources of Puntland

***Shirkadda Al – Hababi waxay kaga qaybqaadanaysaa Mashruuca Ilaalinta Xeebaha Maamulka Puntland Qalabka soo socda:***

1. *6 Raadaro oo wax ka arki kara 96 Mayl Badeed*
2. *4 Doonyaha dheereeya ah oo hubka la saaro oo dhererkoodu yhay 20 mitir Socodkooduna yahay 30 – 35 NM/hr.ahna laba matooraleey ah midkiiba 500 HP ah.*
3. *3 Laanji oo laba Matoorle ah oo Mishiinkoodu yahay 400 – 600 HP. Dhererkooduna yahay 17 – 25 mitir. Socodkooduna yahay 25 – 30 NM/hr.*
4. *12 ah Qalabka Isgaarsiinta.*
5. *18 Doorbeenada habeenkii wax lagu arko ah.*
6. *12 Tabeelaha Diiwaangelinta.*
7. *12 Matoorada Dab dhaliya ah.*
8. *Waxaa kale oo si macnawi ah ay uga qayb qaadanaysaa Tabaradda iyo Diyaarinta dadkii ku shaqayn lahaa qalabka kor ku xusan oo Muwaadiniin reer Puntland ah.*

*Said Mohamed Rage*

*Wasiirka Kalluumaysiga,Dekedaha,G/Badda & Khayraadka Badda*

MINISTRY OF FISHIRIES, PORTS, TRANSPORT AND MARINE RESOURCES
PUNTLAND STATE OF SOMALIA

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

*Ministry of Fisheries, Ports, Marine Transport & Marine Resources*
*Office of the Minister*

*Ref:OMFPMT&MR/GW/01/06*

*Date:12/07/06*

KU : GUDOOMIYAHA GOLAHA WAkIILADDA DGPL — GAROWE.
KU : GOLAHA WAKIILADDA EE DGPL — GAROWE

## Ujeedo: WARBIXIN GUUD

**Mudane Gudoomiye, Mudanayal,**

Waxaa sharaf.ii ah in aan halkaan ka soo jeediyo Warbixin kooban oo ku saabsan Wasaaradda KDG&KHB.Wasaaraddu waxay ka mid tahay Wasaaradaha ay hawlaheedu ugu baaxada weyn yihiin Maamul Goboleedka Punland, Wasaaradu waxay u xilsaarantahay:

- Maamulka iyo horumarinta Dekadaha iyo Gaadiidka Badda
- Horumarinta iyo ka faa'idaysiga Kalluumaysiga iyo Kheyraadka Badda iyo Ilaalinta Xeebaha Baddeena
- Xiriirka Ganacsiga Caalamka
- Horumarinta Dhaqaalaha Bulshada(Kalluumaysiga)
- Samayn Daraasad lagaga Faaiidaysan karo Khayraadka badaheena
- Kaabida Dakhliga Dawladda

## A)Dekedaha iyo Gaadiidka Badda

Wasaaradu waxay maamushaa Dekadda Bosaaso iyo dhamaan marsooyinka xeebaha Dawlad Goboleedka Puntland. Dhismaha Dekedda Bosaaso wuxuu qayb ka ahaa mashruuc balaaran oo ay maalgelisay dawladda talyaaniga kana koobnaa dhowr qaybood. Mashruucaas waxaa ka hirgalay qaybtii kowaad oo keliya oo dhamaatay 1990, burburkii Dawladdii Soomaaliya waxyar ka hor.
Waxaa Dawladdii burburtay iyadoo qaybtii kowaad ee Dekedda ee la dhamaystiray aan la qalabayn, sidaas daraadeed ma suragelin in Dekaddu ay yeelato Bakhaaro(Ware houses), Tug Boat iyo Qalabka Dejinta iyo Rarida IWM.

Dekaddu waxay ka koobantahay laba qaybood oo kala ah:

- Qaybta Doonyaha oo ay ku xiran karaan ilaa 7 doonyood
- Qaybta Maraakiibta oo ay ku xiran karaan ilaa 2 markab

Dekedda waxaa bishii ku soo xirta celcelis ahaan 10 Markab iyo 70 Doonyood.Gaadiidkaasi wuxuu keenaa badeecado kala duwan, wuxuuna ka qadaa Dekadda Xoolaha nool iyo badecado kale.

Dekeddu waa mid dhismo ahaan iyo dhan awoodeedba kooban,waxaana asal ahaan loogu talagalay Doonyo iyo Maraakiib yar yar,Cabbir ahaan marka Dhererka iyo Taagga Moolka (depth) loo Fiiriyo waa 170mitir iyo 7meter oo ah dhinaca Maraakiibta iyo 311 mitir iyo 3.5meter oo ah Dhinaca Doonyaha

Dekedda waxaa ku xiran kara Maraakiib ilaa 6000 Ton ah iyo Doonyo ilaa 1000 Ton ah,waxaa kale oo Dekedda Adeegsada Doonyaha Kalluumaysiga iyo Laashash Badeecadaha u qaada Degmooyinka iyo Magaalooyinka ku yaal Xeebaha Dawlad goboleedka Puntland (Sida Caluula, Qandala ,Xaabo,iwm).

Dekedda Bosaaso,ka sokoow Gobolada Puntland waxay kaloo u adeegtaa Gobollada dhexe iyo kuwa Koonfureed,woqooyi Galbeed ee Dalka Soomaaliya iyo Degaamada Soomaaliyeed ee Itoobiya.

Dekadda Bosaaso waa isha ugu muhiimsan dhaqaalaha dawlad goboleedka Puntland ee Soomaaliya, waxayna shaqeynaysay 16kii sano ee ugu dameeyey,hase yeehee waxaad moodaa manta inay noqotay itaal gab,ayna u baahantahay in wax laga qabto.

## BAAHIDA DEG DEGA AH EE DEKEDDA BOOSAASO

- In Dhamaan Qaybaha kala Duwan ee Dekeda lagu sameeyo Dayactir Guud ahaan, maadaama aan wax Dayactir ah lagu samayn 16kii Sano ee La isticmaalayey
- In la Xafaaro Dekedda Gudaheeda si looga saaro ciida Buuxisay.si aanay u noqon mid dhaqan ka bax ah.

- In Bakhaaro Badeecadaha la dhigo loo dhiso Dekedda,

- In Dekedda loo iibiyo Qalabka Dejinta iyo Rarista

- In ay Dekeddu yeelato TUG BOAT

- In Dekeddu yeelato Dab demis u gaar ah

- In la helo Dhaqaale lagu Ballaariyo Dekedda

- In Dekeddu yeelato Sharci Gaar ah oo lagu maamulo(PORT OPERATION REGULATIONS) iyo Mid Maamul (PORT MANAGEMENT SYSTEM)

- In Dekeddu Yeelato Dhamman Qalabka Badbaadada ee Dekeddaha

- In Dekeddu yeelato Dhammaan Qalabka Isgaarsiinta Ee Dekedaha Adduunku leeyihiin.

Haddaba MudanGudoomiye,Mudanayaal,Waxaan Golaha Xukuumadda u soo Jeedinaynaa in laga hortago Khataraha ku soo fool leh Dekedda kuwaas oo sababaya in ay Xiranto haddii aan wax laga bedelin siday hadda tahay,

Sidaas awgeed,Waxaan Codsanaynaa in Khidmadaha ka soo xerooda Gaadiidka Isticmaala Dekedda loo Daayo Dayactirtirka iyo horumarinta Dekedda sida ay yihiin Dhammaan Dekedaha Caalamku,

**F.G Mudane Gudoomiye,Mudanayaal waxaa xusid mudan in Dekedda Bosaaso xitaa aanay lahayn Laashka Fasaxaadda ee loogu tago Gaadiidka yimaada,taasi waxay idin tusaysaa in ay tahay nasiib darro haysata maamulka Puntland oo ishii Keliya ee uu dhaqaalaha Ka heli jirtay ay tahay maanta meel Burburtay.**

## B) DHINACA KALLUUMAYSIGA

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal haddii aan idiin ka waramo dhinaca Kalluumaysiga,intii aan wasaaradda joogay waxaan wax ka qabanay Xeebaha Baargaal ilaa Garacad, taas oo hayadihii wax ka qabanayey aan
Is raacnay,si wada jir ahna aannu u soo saaray war bixin kooban oo loo jeedinayo Dawladaha deeq bixiyayaasha iyo hayadaha in dhulkii Tsunaamigu ka dhacay la geeyey Shabaag iyo doonyo iyo dhismayaal oo keli ah, hase yeeshee taasi aanay noqon mid wax ka qaban karta

sababtoo ah dadkii xeebaha degan maanta ayey ugu dhaqaalle xun yihiin,si arrintaa looga baxo Wasiir ahaan waxaan hayadihii u soo jeediyey in si loo helo negaansho dadka xeebuhu ku negaanayaan wax soo saarka Badooda in la loo Sameeyo Kaabayaasha ay ka heli karaan Noloshooda kuwaas ah:

1. in la helo Qaboojin dhan ugu yaraan 50 ton oo kayd ah(cold facility)
2. in la helo meeshii Kalluumaystadu ka qaadanayeen barafka(Ice makers)
3. in la helo Dekedo yar yar oo ay doonyaha ku xiran karaan(Fisshing Jetties)
4. in la helo meeshii ay doonyaha ku dayactiri lahaayeen(Boat repairing)
5. in laga sameeyo Magaalooyinka Bosaaso ,Qardho, Garoowe, galkacayo meelihii lagu gadi lahaa Kalluunka (Fish shop centers)
   si kalluunkii xeebaha laga soo saaray looogu helo suuq, dadkii wax soo saarkuna aanay suuq u waayin.
   - Wax soo saarka Baargaal iyo Haafuun waxaa loo suuq geeynayaa magaalada Bosaaso.
   - Wax soo saarka Benderbayla waxaa loo suuq geeynayaa Magaalada Qardho.
   - Wax soo saarka Eyl waxaa la geeynayaa Garoowe.
   - Waxa soo saarka Garacad & Kulub waxaa la geeynayaa Gaalkacayo.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal haddii aan idiin ka waramo dhinaca Badda cas min Laskoreh ilaa Caluula ,waxaa wadnaa in World Bank uu kiciyo dhammaan Wershedihii hore Dawladdu u lahayd,sida Laskoreh,
Necfish Bosaaso, Qandalla, Xaabo, Bareeda iwm. Maalmahan ayaana laga yaabaa in laga wada hadlo world bank iyo Hayadaha kale.

Intaa waxaa dheer oo aan jecelahay in aan idin la socodsiiyo waxaa kale oo jira Dugsiyo lagu barto Aqoonta Badda iyo Kalluumaysiga oo aan jecelahay in aan hirgelino.kaas oo aan idin tusi doono qaabkuu noqonayaa iyo sida aan jecelahay inuu noqdo(Maritimes Shools and College Studies).

## C)Dhinaca Ilaaalinta Xeebaha

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal haddii aan idiin ka waramo dhinaca ilaalinta xeebaha min Laasqoray ilaa Garacad,waxaan samaynay qorshe Staratijadeed oo lagu ilaalinayo dhammaan Xeebaha DGPL.kaas oo ah mid Ciidan iyo mid Isgaarsiineed bad iyo Berriba.
Waxaa jirta in Wasaaraddu la wareegtay dhammaan qorshaha ilaalinta ee xeebaheena iyo Maamulideeda iyo hawlgelinteedaba halkii waagii hore ay shirkaddo ka hawl geli jireen,taasna waxaa kalifay markii Dawladdii iyo shirkadihii marnaba gaari waayeen qorshe sax ah oo badda lagu ilaaliyo.
Waxaa qorshaha wasaaraddu yahay in la helo ciidan adag oo ka kooban dhammaan Gobollada DGPL si Hufan iyo Tayo ahaan u hanan kara Ilaalinta xeebaha DGPL.
Waxaa jira in Baraha ilaalintu noqon doonaan Laasqoray,Bosasso,
Qandalla, Caluula, Baargaal,hafuun, bayla,Eil,garacad,kulligoodna ay yeelan doonaan Ciidan,Isgaarsiin,Gaadiid bad iyo berriba.

Barta Hogaamintuna ay noqon doonto Dekedda Bosaaso. Wallow aan jecelahay in Bar kale oo hogaamineed la helo oo dhinaca Badweynta Hindiya (Hafun ama EIL).

Mudane Gudomiye, Mudanayaal, waxaan xooga saaraynaa sidii loo fulin lahaa dhammaan hawlahaas aan kor ku soo sheegay,dhinaca ilaalinta waxaan jecelahay in aad si fiican u eegtaan Qorshaha Hawlgalka ee Shirkadda Al Habaabi Dawladdu la gashay.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, Shirkadda Al habaabi waxaan ka la wareegaynaa dhammaan Qalabka maalgelinta iyo Gaadiidba ama Isgaarsiineed.markii ay dhammaystiraan mashruuca Shirkaddu waa maalgeliye iyo la taliye keliya wax kale oo ay hawsha ilaalinta ku leedahay ma jirto.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal,waxaa jiray shirkad kale oo hore hawshaas dawladda ugu qaban jirtey lana yiraahdo Somcan.
Haddii ay shuruudaha wasaaradda raacayso waxba kama qabno in aan kala wareegno qalabka ilaalinta badda ee ay gacanta ku hayaan.waana ka wada hadalnay madaxdooda iyo Masuuliyiinta dawladda qaarkood.haddii lays af garto waa arrin aan sugayno heshiiskeeda haddii alla yari.

## Mudane Gudoomiye,Mudanayaal, Waxaan halkan idiin ku soo gudbinayaa :

- Heshiiskii Shirkadda Al habaabi ay dawladdu la gashay,Golaha Xukuumaduna soo Ansixiyey.

- Dhismihii Ciidan Badda Puntland oo dhan 180 Askari Dhammaantood oo laga keenayo Dhammaan Ciidamada DGPL.Hase yeeshee Golaha wasiiraddu soo ansixiyeen.


- Dekedda Bosaasso Qorshaheeda horumarineed oo Golaha wasiiraddu go,aamiyeen in loo helo Adeegeeda si ay hawsheeda u qabsato,taas oo ah in loo daayo adeegyadeeda si loogu helo qaab horumarineed iyo Hayado Caalami ahba.

Dhammaad iyo hawl wacan.

**Said Mohamed Rage**


**Wasiirka wasaaradda kalluumaysiga,Dek,G/Badda & Kharaadka Badda ee DGPL.**

MINISTRY OF FISHERIES, PORTS, TRANSPORT AND MARINE RESOURCES PUNTLAND STATE OF SOMALIA




Boosaaso
(Bandar Cassim)
Bandar Murcaayo
Caluula
Breeda'
Buhaalo
Qandala
Bargaal
Laasqoray
Hurdiyo
Xaafuun
(Erigavo)
BARI
Iskushuban
SANAAG
Qardho
Dudo
Bandarbeyla
Garadag
Xudun
Taxeex
SOOL
Garoowe
Buuhoodle
Laascaanood
NUGAAL
Gori Fit
Eyl
Berdaale
Xamure
Beyra
Seemade
Gaalkacyo (Galcalo)
MUDUG
Garacad


Tel 4722238 fax 4761783 K.S.A – P.box 330654 Riyadh 11373






Eng. Rolan


(4)
















Eng. Robles 6





| DOWLADDA PUNTLAND | | PUNTLAND STATE |
|---|---|---|
| EE SOOMAALIYA | | OF SOMALIA |
| XAFIISKA MADAXWEYNAHA | | OFFICE OF THE PRESIDENT |
| Ref:MW/DPS/150/2005 | Bosaso | Tuesday, December 27, 2005 |

# *Heshiis Shaqo Muddo Leh*

Maanta oo taariikhdu tahay 27/12/2005 waxaa heshiis dhexmaray:

1. Xukuumadda Soomaaliyeed oo ay mataleyso Dowlad-goboleedka Puntland uuna tana danbe matalaayo Mudane Wasiirka Kalluumaysiga, Dekedaha iyo Xeebaha Ismaaciil Shire Jaamac isaga oo ah Wasiirka u xilsaaran hawshaas waxaa lagu tilmaamayaa **Dhinaca 1aad.**
2. Mu'asasadda Khaalid Al-xabaabi ee adeegyada Badda eel eh R L R 19770063 ee ka soo baxday wasaaradda ganacsiga dawlad goboleedka puntland ee soomaaliya , waxaana matalaya Khaalid Maxamed alxabaabioo ah Milkiilaha iyo maareeyaha Guud waxaana logu tilmaamayaa heshiiskaan **Dhinaca 2aad.**

*Hordhac*

Dhinaca 1aad wuxuu doonayaa in uu hirgeliyo mashruuca ilaalinta Xeebihiisa kana ilaaliyo Kalluumaysiga aan sharciga ahayn, isagoo kaashanaya dhinaca 2aad xagga La-talinta iyo maalgelinta mashruuca. Iyadoo mid ahaan dhinaca 2aad waafaqay in uu iskaashi la yeesho dhinaca 1aad xagga samaynta calaamadaha kaluumaysiga, qalabka kaluumaysiga iyo ilaalinta khayraadka badda diraasad dhinac kasta ah. Iyadoo la diyaarinayo diraasad lagu suurtagelinayo in labada dhinac wada geli karaan shaqo wadajir ah, iyadoo ay u dhexayso shirkadda al/khayre marine resources inay gacan ka siiso wixii khuseeya heshiiskan. Iyadoo la diyaarinayo diraasad waxku ool ah eek u saabsan khayraadka badda ee dawlad goboleedka puntland.
Kaddib markii lagula kulmey Madaxweynaha Puntland Maxamuud Muuse Xirsi Hoteelka Sheraton maalintii Khamiista 2005/6/19, uuna u soo cusboonaysiiyey codsiga Xukuumadiisa dhinaca 2aad in uu maalgeliyo mashruuca.

Kaddib markii dhinaca 1aad uu u soo jeediyey si rasmi ah dhinaca 2aad

iyo kooxdiisa farsamoyaqaanka ah in ay soo booqdaan magaalada Boosaaso ayna la kulmaan Madaxda, booqashadaas oo uu aqbalay dhinaca 2aad, uuna booqday dhinaca 2aad. Magaalada

_Bosaaso_____taariikh 2005/7/8. Waxay labada dhinac isku waafaqeen in ay wadajir uga howlgalaan xagga nidaaminta howlaha Kalluunaysiga ee mandaqadda Puntland heshiiskaan oo nidaaminaya xiriirka labada dhinac, waxayna ku heshiiyeen sida soo socota:

Qodobka 1aad

Hordhaca sare ku qoran waa qayb ka mid qodobbada heshiiska.

Qodobka 2aad:Afka Rasmiga ah ee Heshiiska

Afka rasmiga ah ee heshiiskaan waa Somali iyo Carabi, Afka Carabiga aya ah kan rasmiga ah oo lagu dhaqmayo marka la fasirayo heshiskaan ama qayb ka midah.

Qodobka 3aad: Sifada heshiiska.

Ujeeddada mashruucaan waa ganacsi la xiriira maamul dabiici ah oo aan lug ku lahayn arimo ciidan aana taagarayn ururo mamnuuc ah iyo hay'ado argagixiso waxaana shaqadeedu ku kooban tahay fulinta waajibaadka maamul ee heshiiskan ku cad kaasoo ku saabsan ilaalinta khayraadka deegaanka badda puntland iyo badbaadinta xaalufinta badda kuwaasoo ah qodobada muhiimka ah ee heshiiskan.
Inaan dhinaca koowaad u adeegsan karin qalabka mashruucan nooc kasta ha ahaadee waxaan heshiiskan ku xusnayn kaasoo ujeedada muhiimkiisu tahay ilaalinta kaluumaysiga iyo bay'adda taasoo labada dhinacba ay ka wada qayb qaadanayaan.

Qodobka 4aad: U Sinaanshaha Sharciga Hortiisa.

Arimaha ku saabsan fulinta heshiiskan iyo xiriirka labada dhinac darafka koowaad wuxuu ula macaamilayaa isagoo la shirko ah dhinaca labaad ee fulinta qodobada ku xusan heshiiskan, kuwaas oo ah ganacsi iyadoo labada dhinac u siaman yihiin arimaha sharciga.
Wixii la xiriira arimaha ku saabsan gaadiidka badda ee dawliga ah iyo baarjadaha dagaalka heshiiskan kuma jirto waxaana la xidhiidhaya wasaaradaha ku shaqada leh iyagoo maraya nidaamka dawliga ah iyadoo aysan waxba ka badalayn heshiiskan lana ogaysiinayo hay'adda ilaalinta xeebaha kharashkoodana ay iyagu isu qabaan.

## Qodobka 5aad: Ku Koobnaanta Mashruuca.

Mashruucani wuxuu ku koban yahay oo kaliya dhinaca koowaad iyo dhinaca labaad iyadoo dhinaca labaadna uu ka yahay mashruucan maalgaliyo iyo la talaiye dhinaca koowaad ma soo galin karo dhinac kale waxkastoo sabab ah.

## Qodobka 6aad: Soohdinta Juqurafiga ah ee heshiiskan.

Biyaha dawlad goboleedka puntland ayaa ah saldhiga heshiiskan sida waafaqsan soohdimaha sharciga ah ee puntland.

## Qodobka 7aad: Sifada Dhinaca Labaad.

Dhinaca labaad wuxuu heshiiskan ka yahay lataliye iyo maalgaliye waxana dhinaca koowaad waajib ku ah inuu hago dhinaca labaad, wuxuuna xaq u leeyahay dhinaca labaad inuu marsada boosaaso soo galiyo gaadiidka badda ee mashsruucan.

## Qodobka 8aad.

Gaadiidka badda ee la shaqeeya mashruucan waxay sidanayaan calanka soomaalida waxana wadaya hawlwadeeno soomaali ah waxana laga dhaafayaa cashuurta iyo kharashaadka dekadaha dawlad goboleedka puntland.

## Qodobka 9aad

Dhinaca 1aad wuxuu ilaalinayaa sharciyada iyo curfiga dowliga ah ee lagu dabbaqayo qaybkasta oo ka mid ah mashruucaan, waxa kale oo dhinaca koowaad ogaysiin rasmi ah siinayaa dhamaan safaaradaha iyo isagoo si rasmi ah u ogaysiinayaa warbaahinta badaha (Notice To Mariner) iayadoo lagu dabakhayo nidaamka ilaalinta xeebaha soomaaliyeed oo gaar u ah mandaqadda puntland iyo ku dhaqanka dhamaan curufyada dawliga ah oo laysku raacsan yahay oo ku saabsan nidaamka kaluumaysiga ee caalamiga ah.

## Qodobka 10aad

Dhammaan masaarifta iyo mushaharooyinka dadka Soomaaliyeed oo u shaqaynaya dhinaca 1aad mashruucaan (Ha ahaadeen askar ama kuwa raacsan wasaaradda dhinaca 1aad), sidoo kale tababarrada la qaban doono waxaa mas'uul ka ah dhinaca 1aad, wixii ku saabsan shaqaalaha mashruuca loo qoray waxaa mas'uul ka ah dhinaca 2aad.

LUUMAYSIGA D... IIDKA BADD...

## Qodobka 11aad

Dhinaca 1aad waxaa waajib ku ah in uu soo magacaabo shaqaale leh khibrad shaqo rasmi ahna loogu magacaabay mashruuca lana shaqeyn kara dhinaca labaad ama shaqaale kale oo dibadda laga keenay, haddii ay soo baxaan shaqaale aan rasmi ahayn waxaa mas'uuliyadda buuxda iska leh dhinaca 1aad, sidoo kale dhinaca 1aad wuxuu soo magacaabayaa xiriirye ka wakiil ah kaas oo ah cidda mas'uulka ah ee la xiriiraya dhinaca 2aad si shaqada loogu hirgeliyo sida ugu munaasabsan.

## Qodobka 12aad

Dhinaca 1aad waxaa laga doonayaa in uu (xalliyo) dhammaan dhibaatooyinka ka horyimaada mashruuca marka ay suurtagal tahay dalka gudihiisa ama dibadiisa(gudaha badda Puntland). dhinaca 1aad wuxuu si buuxda mas'uul uga yahay nabad gelyada shaqaalaha dhinaca 2aad ee ka shaqaynaya mashruuca iyo qalabkiisaba, wuxuu kaloo dhinaca 1aad mas'uul ka yahay ka dhaafidda cashuurta iyo khidmadaha Dowladda dhammaan qalabka mashruuca ee dibadda laga keenay iyo bixinta ruqsada dal ku songelidda ee shaqaalaha mashruuca.

Dhinaca labaad wax xil ahi kama saarna haddii qof ama qalab wax ku gaadhaan ama uu dhinto qofku sabab u gaar ah oo aan ku lug lahayn mashruuca, haddii dhibaatadu ay tahay mid dabiiei ah oo ka dhacda shaqada mashruuca dhexdiisa waxa qaba mashruuca iyadoo la raacayo qawaaniinta caalamiga ah iyo curfiga badda.

## Qodobka 13aad

Haddii dhinaca 1aad doonayo in uu hormariyo qalabka mashruuca ee ku saabsan mashruuca isagoo adeegsanaya qalab maalgelin isagu leeyahay ama mid kaalmo- shisheeye ah ma khuseyso arrintaasi heshiiskaan nuxurkiisa, waxaana waajib ah in awoodaas loo jiheeyo adeegidda mashruuca naftiisa iyadoo lagu darayo mashruuca intiisa kale, iyadoo hantidaas uu iska leeyahay dhinaca 1aad, waxaana xafidaya maamulaayana dhinaca 2aad.

## Qodobka 14aad: Ganaaxyada.

Labada dhinac waxay ku heshiiyeen haddii hal dhinac kaligiis galo heshiis ama soo saaro ruqso oo aan dhinaca kale la ogayn, waxaa la saaraya ganaax la mid labalaab qiimaha heshiiska, waxaana la siinaya dhinaca kale, sidoo kale dhinacyadu waxay ku heshiiyeen marka dhinac ka baxo heshiiska ama uu soo geliyo dhinac kale oo aan heshiiska ku jirin waxaa dhinaca khaladku ka yimi bixinayaa lacag dhan malyan iyo bar doollarka maraykanka ah, iyadoo dhinaca 2aad leeyahay dhammaan qalabkiisa mashruuca.

## Qodobka 15aad: Ansixinta.

Dhinaca koowaad waxa heshiiskan u saxiixaya madaxwaynaha dawlad goboleedka puntland waxana ansinaya golaha wasiirada iyo golaha wakiilada puntland sida ku cad dastuurka puntland (waxa lagu lifaaqayaa heshiiskan nuqul ku qoran afcarabiga).

## Qodobka 16aad

16/ Arrimaha Maaliyadda

- 16/1 B) Dhinaca 2aad wuxuu si buuxda u qalabaynayaa mashruuca,
- qalabkaas iyo aaladahaas (guurtada ah) ee ku xusan diraasada rasmiga ah ee mashruuca.

16/2 B) dhismaha Goobaha Ilaalinta waxaa diyaarinaya dhinaca 1aad kuwaas oo ku xusan diraasadda mashruuca, sidoo kale dhinaca 1aad wuxuu diyaarinayaa degaanka dhismaha maamulka, iyo gaadiidka dhulka ee gaarka u ah mashruuca waxa kharashka maalgelinta si horumarin ah u bixinaya dhinaca labaad hase yeeshee dhinaca koowaad wuxuu ku bixinayaa si tartiib-tartiib ah

16/3 B) Labada dhinac waxay si wada jir ah u bixinayaan kharashka hawlgalka aasaasiga ah ee mashruuca sida, shidaalka, olyada, iyo wixii la mid ah. Hase yeeshee wixii ku saabsan qalabka dayactirka iyo farsamada waxa qaba dhinaca labaad.

16/4 B) Dakhliga marka laga jaro kharajka howlgalka ee ku qoran qodobka 16/3 B) dhinaca 1aad wuxuu leeyahay 51%, dhinaca 2aadna 49%, dakhligaas la wadaago wuxuu ka imaanayaa soo saarka rukhsooyinka Kalluumaysiga, ganaxaa ka yimaada maraakiibta lagu helo xad gudubyo ganaaxa ka yimaada waxyeelada bii'adda oo ay geystaan dhamaan gaadiidka badda iyo boqolayda ka timaada wax soosaarka.

16/5 B) Dhamaadka Bilkasta oo miilaaddi ah waxaa la xirayaa xisaabaadka guud ee kharajka iyo dakhliga ee mashruuca dhammaantood.
Saamiyada labada dhinac waxaa ugu dambayn la bixinayaa maalinta 4aad
Ee bilkasta haddii maalintaasi ahayn maalin fasax rasmi ah

Xafiis xisaabiye qaanuuni ah ayaa diyaarinaya dhammaan Xisaabaadka soona habeynaya miisaaniyad sanadeedka. Dakhliga waxaa lagu shubayaa ama lagu kaydinayaa xisaab (account) wadajir dhinacyadu u
U leeyihiin lagana furayo Puntland oo ay wada saxiixeen labada dhinac, xisaabta la wadaago waxaa wax looga saari Karaa, laba saxiix ee dhinacyada wadajir u leeyihiin iyadoo uu jiro Qoraal dhinacyadu ku caddeeyeen wadajir ahaan dhammaystirka Kharajka maaliyadeed qoraalkaas oo wata saxiixa labada dhinac.

16/ T **Arrimaha Maamulka (Maareynta).**

16/1 T Dhinac keligiis xaq uma laha in uu soo saaro rukhso aan lahayn saxiixa iyo shaabadda labada dhinac, sidoo kale rukhsaddu ma noqoneyso mid sharci ah haddii aan lagu soo saarin qaab gaar ah oo wadata astaanta dhinacyada saxiixooda iyo shaabadda rasmiga ah ee labada dhinac. Laga bilaabo taariikhda saxiixa heshiiskaan uu dhaqan galay heshiisku wixii heshiis horay loo galay waxay jirayaan muddo lix bilood ah, ha ahaadeen ruqsooyin maxalli ah ama kuwo shisheeye la siiyey. Marka la saxiixo heshiikaan ka dib dhinaca 1aad waxaa laga Doonayaa in uu keeno liiska ruqsooyinka oo kaamil ah waxaana La samaynayaa xisaab xir cusub ee dakhliga la helo iyo Muddada hartay iyo qaybta dhinaca 2aad ee ruqsooyinka jiraya Lixda bilood muddo ka badan.

16/2 T Meesha lagu soo saarayo ruqsooyinka:- rukhsooyinka Kalluumaysiga waxaa soo wada saaraya wasaaradda Kalluumaysiga iyo dhinca 2aad,waxaana laga bixinayaa Magaalada Boosaaso, dhinaca 2aad wuxuu yeelan karaa xafiis suuqgeyn ah oo ku yaalla dalka imaradka wuxuuna ku lug yeelan karaa soo diyaarinta heshiisyada isagoo matalaya dhinaca 1aad.

16/3 T dhinaca labaad wuxuu xaq u leeyahay inuu magacaabo ciddii uu arko munaasib ee shaqaale ajnabi ah mashruuca kuwaasoo ku saabsan qaybta farsamada dhinaca labaad ka dib marka la wargaliyo hay'adaha rasmiga ah, dhinaca 1aad waxa laga doonayaa marka uu diyaariyo hawlwadeeno askar ama rayid ah ee soomaali ah ayna ku jiraan cid aqoon u leh afafka carabiga ama ingiriiska ee goob kasta jooga.

6/4 T Labada dhinac waxay isla agaasimayaan soo saaridda xeer hoosaadyada guud iyo nidaamyada ku saabsan hawlaha mashruuca sida calaamadaha gaarka u ah kaluumaysiga ganaaxyada, habka shaqada, waxaana si wadajir ah u maaraynaya labada dhinac.

Qodobka 17aad

Hadii ay wax gaadhaan gaadiidka badda iyo qalabka farsamada ama ay dagaan mudada heshiiskani uu socdo waxa laga hagaajinayaa xisaabta mashruuca, haddii rasaas layswaydaarsado dhinacyo kale ayna khasaare ku dhacdo qalabka mashruuca waxa masuul ka ah dhinaca koowaad.

Qodobka 18aad

Mulkiyadda hantida dhinaca 2aad oo kala ah maraakiib ,qalab badeed ama isgaarsiineed oo loo adeegsadey heshiiska waxay gaar u tahay isaga .Marka heshiisku dhammaado oo aan la cusboonaysiin wuxuu xaq u leeyahay in uu ugu dhaqmo siduu doono , haddiise dhinaca 1aad doonayo in uu yeesho milkiyadda hantidaas muddada go'an ee heshiiskaas ka dib waxaa lala gelayaa heshiis dhinaca 2aad,waxaana la qorayaa lifaaq raacsan heshiiska arrintaasna gaar u ah waxaana saxiixaya labada dhinac.

Qodobka 19aad

Muddada heshiisku waa 5 sano oo la cusboonaysiin karo muddo la mid ah haddii labada dhinac mid ka mid ahi uusan ogaysiin dhinaca kale lixbilood ka hor inuu ka baxayo heshiiska sidoo kale waxay ka bilaabanaysaa mudada heshiisku dhamaan ansixinta sida ku cad qodobka 15aad iyadoo la siinaayo sugitaanka muddo sadex bilood ah inuu ku fuliyo marxaladda koowaad.

Qodobka 20aad.

Haddii dhinaca labaad ay ka hortimaado dhibaato ama carqalad ugana timaado dhinac dawladeed, dhinaca koowaad waxa waajib ku ah inuu si degdeg ah wax uga qabto intii karaankiisa ah hase yeeshee haddii taasi suurtagal noqonwaydo darafka labaad wuxuu xaq u leeyahay inuu joojiyo hirgelinta mashruuca wax ganaax ah oo uga iman karaana ma jiraan.

Qodobka 21aad.

Haddii khilaaf dhaco eebbe ma saamexee waxa lagu xalinayaa wada xaajood iyo isafgarad haddiise la gaadhi waayo xal waxa maxkamadda shaariqa ee dalka imaaraadka carabta ayaa yeelanaysa awoodda dhagaysiga dacwadda iyo go'aan ka gaadhideedaba waxana waajib ah in lagu fasiro qodobada heshiska si waafaqsan qawaaniinta mandaqadda shaariqa labada dhinacna ay

aqbalaan go'aanka maxkamada shaariqa.

Qodobka 22aad

Darafka labaad wuxuu wuxuu gali karaa heshiis hoosaad haddii shaqada looga baahdo.

Qodobka 23aad

Lama bedeli karo heshiiskan ama qodob ka mid ah haddii aysan labada dhinac ku heshiin Heshiiskani wuxuu ka kooban yahay 23jk qodob (bandi) iyo lix nuqul oo ka kooban lix bog, labo waxa leh labada dhinac afarta kalena waxa leh hay'adaha ay khusayso oo xiriirka la leh arimahan gudaha iyo dibadaba.

*Wallaahu Weliyo Towfiiq.*

***Dhinaca 1 aad***

Wasiirka Kalluumaysiga ,Dekedaha iyo Xeebaha

Ismaaciil Shire Jaamac

___________________

***Dhinaca 2 aad***

Mu'asasadda Khaalid Al-Xabaabi ee adeegyada Badda uuna matalaayo

Milkiileheeda iyo Maareeyeheeda Guud.

Khaalid Maxamed Al-Xabaabi

___________________

*Oggolaasha Golaha Wasiirrada ee DGPL* *Oggolaasha Golaha Wakillada DGPL*

Madaxweynaha Dowlada PL.

Maxamuud Muuse Xirsi

..................................

# التصور المختصر الاستشاري لمشروع خفر السواحل
# ولاية بونتلاند- الصومال بطول ١٣٠٠ كيلومتر تقريباً

أهداف المشروع :


١. تحقيق الأهداف الاستراتيجية لحكومة إقليم البونتلاند على سواحلها القانونية وذلك السيطرة الكاملة على المنطقة من خلال توفير المتطلبات والتجهيزات المادية والإدارية التي تخدم ذلك ومن خلال الآتي .

٢. توفير المراقبة الإليكترونية والبصرية لتامين المياه الإقليمية.

٣. مراقبة حركة السفن التجارية في المياه الإقليمية و مراقبة سفن الصيد ( المحلية والأجنبية ) المصرح لها بالصيد والعمل داخل المياه الإقليمية ( ضمن ضوابط وقوانين الصيد) وإصدار الرخص الخاصة بذلك ومتابعتها.

٤. اعتراض السفن الغير مصرح لها استخدام المياه الإقليمية في عمليات الصيد و خلافه و يتم ذلك من خلال توفير ( ٨ ) نقاط مراقبة بما فيها مركز السيطرة بالميناء مجهزة برادارات وأجهزة مراقبة بصرية وأجهزة اتصالات وذلك على امتداد الساحل وعلى مسافات تحددها مناطق الصيد الرئيسية كما هو مبين في الرسم أدناه على طول ( ١٣٠٠) كيلو متر وعمق (٩٦) ميل بحري داخل المياه .

٥. الرفع من مستوى أفراد خفر السواحل الصوماليين وذلك بالتنسيق لإقامة الدورات الخاصة بذلك باستقطاب خبراء في المجالات المتخصصة والمتعلقة بالسواحل .




" المخطط الافتراضي لمراكز المراقبة "

# الخطوط الرئيسية للمشروع

## تتلخص فكرة المشروع في الآتي :

يعتمد تحقيق السيطرة على التنسيق الكامل بكل من :-

- شبكة الاتصالات.
- خطة المراقبة الاليكترونية والبصرية و كذلك توزيع الوحدات بغرض تحريك الوحدات في الوقت المناسب و بالسرعة التي يتطلبها الموقف.

## و لتحقيق ذلك يلزم الآتي :

أولا : -

١. يجب أن يتوافر لمركز القيادة و السيطرة معلومات عن السفن التجارية و سفن الصيد السابق منحها تراخيص صيد في المياه الإقليمية و المقتربة من الميناء أو المياه الإقليمية.

٢. على جميع سفن الصيد أن تخطر برج مراقبة الميناء ببياناتها مثل:
( اسم السفينة – علم السفينة – رقم التسجيل – نوع السفينة – رقم الترخيص) وذلك عند اقترابها إلى مدى (٥٠ ) ميل بحري .

٣. تكرر السفينة الاتصال و الإبلاغ عند اقترابها إلى مدى ٣٥ ميل محدده خط سير الاقتراب و السرعة .

٤. على سفن الصيد المحلية أخذ الأذن المسبق على مغادرتها موانئ الصيد أو المرافئ والمناطق المشروع استخدامها و تخطر نقاط المراقبة المعنية تبعا لذلك من مركز القيادة والسيطرة أو من مراكز استخراج التصاريح من خلال مركز القيادة.

٥. يتم إخطار نقاط المراقبة المعنية مسبقا عن السفن المتوقع اقترابها من السواحل مباشرة إلى مناطق الصيد و خط سير اقترابها و سرعتها بعد أخذ تلك السفن الإذن من مركز القيادة والسيطرة الرئيسي في التوجه إلى المنطقة.

٦. يتم البلاغ فورا من نقطة المراقبة المعنية عند ظهور أي أهداف غير مبلغ عنها مسبقا إلى مركز القيادة و السيطرة للقيام بالتحقق من الهدف باستخدام اللاسلكي .

٧. في حالة تعذر الاتصال و عدم توافر أي معلومات عن الهدف المقترب للميناء أو إلى نطاق نقطة مراقبة يتم اعتراض الهدف بواسطة اللنشات للتحقق من الهدف .

٨. يتم توقيع جميع السفن المتواجدة في نطاق مناطق الصيد على لوحة الموقف العام بمركز السيطرة وعلى لوحة التوقيع بالنقاط المعنية كل فيما يخصه.

**ثانيـــاً :**

١. يتم تحديد خطوط مرور يومية للنشات و في أوقات مختلفة خلال اليوم و حسب كثافة السفن في المناطق المختلفة .

٢. يتم استخدام قوارب مطاطية أو لنشات في المرور في التحقق في نقطتين حسب حالة البحر أو حسب المتطلبات و يتم ذلك بإخطار مسبق من مركز القيادة الرئيسي للمناطق المسماة (جرعد ، لاسكويل ) .

٣. يتم تمركز جميع اللنشات حسب توجيه مركز القيادة والسيطرة الرئيسي .

و مرفق ملحق ( ١،٢) مقترح بالمعدات و المنشات و الأفراد اللازمة لتنفيذ المشروع

## ملحق رقم ١

١. المعدات المطلوبة :

☒ **تجهيزات مركز القيادة والسيطرة الرئيسي بميناء بساسو :**

i. عدد ١ رادار ملاحي " مدى ٩٦ ميل بحري " .

ii. عدد ١ لوحة توقيع " الموقف العام " .

iii. عدد ١ نظارة ليلية .

iv. عدد ١ محطة اتصال لاسلكي .

v. عدد ١ لنش مرور وتدخل سريع طول بين ( 60- 70 قدم Feet) وسرعه تكون (٢٥-٣٠) عقده وتتكون من ماكينتان قوة كل مكينة تتراوح بين (٢٣٠-٣٠٠ حصان ) .

vi. عدد ١ لنش مرور وتدخل سريع بمنطقة رأس معبر وبنفس المواصفات البند السابق .

☒ **تجهيزات نقاط المراقبة:** برأس عسير، ورأس معبر

i. عدد ٢ رادار ملاحي مدى ٩٦ ميل بحرياً .

ii. عدد ٢ نظارة ليلية .

iii. عدد ٢ لوحة توقيع .

iv. عدد ٢ محطة اتصال لاسلكي .

☒ **تجهيزات نقاط المراقبة:** بمنطقة حابو، ورأس حنون

i. عدد ٢ نظارة ليلية .

ii. عدد ٢ لوحة توقيع .

iii. عدد ٢ محطة اتصال لاسلكي .

iv. عدد ٢ زورق مطاطي أو لنش سريع .

☒ **تجهيزات قوارب المطاطية أو النشات: " و عددها ٢ قارب "**

i. عدد ٢ نظارة ميدان .
ii. عدد ٢ بوصلة فلايك .
iii. عدد ٢ جهاز لاسلكي " PORTABLE VHF " .
iv. أحزمة نجاة .
v. أسلحة مناسبة (خفيفة ) .

☒ **تجهيزات اللنشات : " عددها ٢ "**

i. رادار بحري .
ii. بوصلة بحرية .
iii. عداد سرعة و مسافة.
iv. جهاز اتصال لاسلكي.
v. أحزمة نجاه.
vi. سلاح مناسب متوسط.

**٢. المنشـــاءات :**

**أولاً : تجهيز برج المراقبة بميناء بساسو لاستقبال المعدات التالية :-**

( رادار – نظارة ليلية – لوحة توقيع – جهاز لاسلكي ) .

✓ مبنى إداري.
✓ مبنى مستودع المعدات .
✓ غرفة مولدات احتياطية .

**ثانياً : نقاط المراقبة :**

- تجهيز :

☒ مبنى وبرج للمراقبة لاستيعاب المعدات التالية :

١- برج المراقبة البصرية عدد (٤) أبراج .
٢- نظارة ليلية عدد (٤) .
٣- لوحة توقيع عدد (٤) .
٤- جهاز لاسلكي عدد (٤) .
٥- مبنى المعدات ويشمل غرفة المولدات وقطع الغيار .

## ملحق رقم ٢

بيان الأفراد والكوادر المطلوب تجهيزهم من الجانب الصومالي :

### ❖ طاقم المركز الرئيسي :

i. قائد المركز .
ii. قائد ثاني المركز.
iii. عدد ٣ رئيس وردية .
iv. عدد ٣ عامل رادار .
v. عدد ٣ عامل توقيع .
vi. عدد ٣ عامل لاسلكي .
vii. بالإضافة إلى طاقم كامل لأغراض الراحات والإجازات عدا القائد والقائد الثاني فتكون إجازاتهم بالتناوب .

### ❖ طاقم نقاط المراقبة عدد ٧ :-

i. عدد ٤ x ١ قائد موقع .
ii. عدد ٤ x ١ قائد ثاني موقع .
iii. عدد ٤ x ١ رئيس موقع .
iv. عدد ٤ x ٣ عامل رادار .
v. عدد ٤ x ٣ عامل مراقبة بصرية .
vi. عدد ٤ x ٣عامل توقيع .
vii. عدد ٤ x ٣ عامل لاسلكي .
viii. عدد ٤ x ٢ ميكانيكي .
ix. عدد ٤ x ٢ كهربائي .

بالإضافة إلى طاقم كامل لأغراض الراحات والإجازات عدا القائد والقائد الثاني فتكون إجازاتهم بالتناوب .

## ❖ طاقم زوارق المطاطية أو اللنشات:

i. عدد ٢ X ١ قائد زورق مطاطي أو لنش .
ii. عدد ٢ X ٢ جماعة تفتيش " صعود بواخر .
iii. عدد ٢ X ١ بحري .
iv. عدد ٢ X ١ مدفعي .

بالإضافة لعدد ١ طاقم للأجازات بواقع (٦) أيام راحة شهرية :

## ❖ طاقم اللنشات :

i. عدد ٢ X ١ قائد لنش
ii. عدد ٢ X ١ ضابط أول
iii. عدد ٢ X ١ ريس
iv. عدد ٢ X ١ عامل رادار
v. عدد ٢ X ١ عامل لاسلكي
vi. عدد ٢ X ١ مدفعي
vii. عدد ٢ X ٢ بحري
viii. عدد ٢ X ٢ ميكانيكي
ix. عدد ٢ X ١ كهربائي
x. عدد ٢ X ٣ جماعة صعود على البواخر .

## ملحق رقم ٣

بيان القوانين الخاصة بالصيد في المنطقة، وإصدار التراخيص ، وتسويق الرخصة دولياً ، والنواحي الإدارية المالية :

**أولاً : قوانين الصيد والرسوم المحصلة :**
تقوم المؤسسة مع الجانب الصومالي بإعداد القوانين المنظمة لإعمال الصيد في المياه الإقليمية أو في أعالي البحار بما لا يتعارض مع القوانين الدولية طبقاً لنظام ( E.E.Z) ، وقوانين السلامة الدولية لسفن الصيد.

**ثانياً : طرق إصدار التراخيص واحقية الإصدار :**

تشرف المؤسسة على إصدار التراخيص والتأكد من الوثائق المطلوبة بما فيها القوانين المتبعة لإصدار الرخص والرسوم المحصلة.

**ثالثاً : تسويق أعمال الصيد في المنطقة :**

يتم تسويق أعمال الصيد وإصدار التراخيص وذلك بالطرق التالية :

أ- عن طريق التسويق من خلال مكتبنا بدولة الإمارات العربية المتحدة.
ب- إنشاء موقع على شبكة الانترنت الدولية مع عمل تدشين للموقع.
ج- عن طريق المراسلة بوسائل الاتصال المعروفة للجهات المختصة بعد إعداد حصر للشركات العاملة في مجال الصيد.
د- عن طريق العلاقات الواسعة التي تتميز بها مؤسستنا بهذا المجال .

ويتم إصدار التراخيص تبعا لذلك من مكتب الوزارة في بساسو .

**رابعاً : حماية الحياة البحرية وحماية البيئة :**

تقوم المؤسسة والجانب الصومالي بوضع القوانين المنظمة لحماية الحياة البحرية والبيئة في إطار القوانين الدولية المنظمة لذلك ووضع التطبيقات الاستثمارية الخاصة بها .

# ملحق رقم ٤

بيان بالدورات المقترح عقدها لأفراد خفر السواحل النظاميين الصوماليين والمتفق عقدها على حساب الجانب الصومالي : -

أ- دورة أجهزة الاتصالات السلكية واللاسلكية .

ب-دورة تشغيل الرادار .

ج- دورة السلامة الدولية .

د- دورة تشغيل الأجهزة الملاحية .

ه- دورة تشغيل اللنشات والزوارق .

و- دورة تعليمية عن كيفية اعتراض والتحقق من السفن في مناطق الصيد المختلفة .

## ملحق رقم ٥

### بيان بمراحل تنفيذ المشروع :

تتكون مراحل تنفيذ المشروع من ثلاثة مراحل وفي فترة إجمالية مدتها تتراوح بين سنة ونصف إلى سنتين كلاتي :

**أولاً: المرحلة الأولى: -**

تبدأ بعد تسعون يوماً من تمام توقيع العقد من قبل البرلمان ومجلس الوزراء واعتماد رئيس الحكومة وذلك بتوريد الآتي :

١- عدد ٢ لنش سريع حسب المواصفات سالفاً .
٢- عدد ٢ جهاز رادار المدى ٤٨ ميل بحري (على أساس قيام الجانب الصومالي بتجهيز نقاط المراقبة المكلف بها ) .
٣- عدد ٤ أجهزة اتصال .

**ثانياً : المرحلة الثانية :**

تبدأ بعد فترة تسعه شهور من تاريخ بدأ المرحلة الأولى وذلك بتوريد الآتي :

١. قاربين سريع مطاطي.
٢. عدد ٢ جهاز اتصال .
٣. عدد ٢ جهاز رؤية ليلية .

وذلك بعد استكمال منشآت نقطتي ( قرعد ، لاسكويل ) .

**ثالثاً : المرحلة الثالثة والأخيرة :**

تبدأ بعد سنة ونصف من تاريخ بدأ المرحلة الأولى العقد بتوريد الآتي:

١. استكمال تجهيزات المواقع كما هو مبين في مخطط تجهيز نقاط المراقبة المتبقية.
٢. عدد ١ لنش بنفس المواصفات اللنشين السابقين في المرحلة الأولى.
٣. استكمال المعدات والتجهيزات المصاحبة للبند السابق .

**FAAFINTA** **RASMIGA**

الرسمية الجريدة

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية ارض بونت الصومال

**Sanadka 8-aad. Garowe 25. January. 2007** **Lam. 1**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدةالشهرية

***Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland***


Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

---

# TUSMADA


## Qeybta Koowaad

## Sharci

## Qeybta labaad

## Xeer

## Qeybta Saddexaad

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

***Sharci Lr. 2. ee 15/01/2007, kuna saabsan Wasaaradda Cadaalada iyo Arrimaha Diinta.***


bogaga 105-106

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIYA**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Xafiiska Madaxweyne ku xigeenka Ahna sii hayaha xilka Madaxweynaha**

**Office of the Vice-president being an acting president**

**Sharci Lr.2 ee 15/01/2007, kuna saabsan u bedelada Wasaaradda Cadaalada iyo arrimaha Diinta.**

**Madaxweynuhu**

| | | |
|---|---|---|
| **Markuu arkay** | **:** | **Dastuurka DGPl qodobkiisa 55-aad faqraiisa 1-aad.** |
| **Markuu arkay** | **:** | **Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/189/2006 ee 16/12/2006.** |
| **Asagoo Garowsaday** | **:** | **Urogida xeer sharci Lr.2. Sharci iyo ansixinta Golaha Wakiiladu Sharciga ugu bedeleen.** |
| **Tixgaliyeyna** | **:** | **Doorka Maamul iyo siyaasadeed ee Wasaarada Cadaalada iyo Arrimaha Diintu u yeelatay Ha'ayadaha Garsoorka Puntland.** |

**Wuxuu soo saaray**

**Sharcigan soo socda:-**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay xeer sharci Lr.2. u rogeen sharci iyagoo ku ansixiyey go'aanka sumada iyo taariikhda kore ku cad.

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan garyaqaanka guud iyo kan xog-hayaha Golaha Wakiilada.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintii sharcigani faafinta rasmiga ah ee Dawlada ku soo baxay, wuxuuna kamid noqonayaa sharuucda Puntland, iyadoo cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

**Wabilaahi Towfiiq**

**Mud. Xasan Daahir Maxamuud**
**Madaxweyne ku xigeenka**
**ahna Sii haya Xilka Madaxwenaha**

Puntland State of Somalia
Office of the Vice President
Garowe

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Xeer-sharci Lr.02 ee December 7, 2006 kuna saabsan in wasaaradda Awqafta iyo Arrimaha Diinta loo beddelo wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta

**Madaxweynaha dowladda Puntland,**

Markuu arkay : Dastuurka Puntland,Qodobkiisa 54aad, faqraddiisa 10aad iyo Qodobka 98aad.

Markuu darsay : Baahida loo qabo in magaca wasaaradda Arrimaha Diinta & Awqaafta laga dhigo wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta, qodobka in la beddelo loo baahan yahayna yahay Qod.58aad,faqradda 1aad ee Dastuurka.

Markuu arkay : muhimadda uu beddelkaasi u leeyahay hay'adaha garsoorka

Markuu hubsaday : Inaan garsoorku xaq u lahayn arrimo maamul iyo siyaasadeed, kuwaas oo ay wasaaraddu wakiil uga tahay Golaha Xukuumadda,

Markuu garowsaday : In Guddiga Sare ee Garsoorku sharci ahaan leeyahay awoodaha magacaabidda,shaqo-gelinta,beddelka,dallacsiinta, anshaxa iyo abaalmarinta garsoorayaasha iyo shaqaalaha kale ee garsoorka,

Markuu dhegeystey : Golaha Xukuumadda,

**WUXUU XEERIYEY :**

1- In Golaha Wakiiladu beddelo qodobka dastuuriga ah ee Lr.58 aad faqaraddisa 1aad si loo helo magaca wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta.

2- In wasaaraddu ay hay'adaha garsoorka ku leedahay ilaalin guud kuna eg siyaasadda iyo maamulka.

Maxamuud Muuse Xirsi
Madaxweynaha dowladda Puntland